

Macluumaad ku socda qaxootiga ka yimi Soomaaliya ee codsadey oggolaansho joogitaan oo rasmi ah

Haddii aad tahey qaxooti ka yimi Soomaaliya oo codsadey oggolaansho joogitaan oo rasmi ah, waxey UDI marka hore qiimeynaysaa inaad heysan karto xaaladaada qaxootinimo. Sidaa darteed ayaa kabaaraandegida codsigaagu qaadanaysaa waqti dheer.

Waxey UDI hadda qiimeynaysaa in isbedelka ka dhacey Muqdisho uu keenayo in Soomaalida la siiyey qaxootinimo intii ka horreysay 1. oktoobar 2014, ay weli u baahanyihiin magangelyo, ama iney ammaan u tahey haddii ay Muqdisho ku laabtaan. Tan waxa go'aamiyey Wasaaradda caddaaladda- iyo Heeganka.

Haddii aad dooneyso inaad wax badan ka ogaato, cidda la siin karo magangelyo (asyl) iyo cidda lumin karta degenaanshaheeda, waxaad akhriyi kartaa warqadda warbixinta:

- [Siyaasadda magangelyada iyo hawlaha oggolaashada joogitaanka ee norwiijiga \(somalí\) \(pdf, 410 kB\)](#)
- [Siyaasadda magangelyada iyo hawlaha oggolaashada joogitaanka ee norwiijiga \(norsk\) \(pdf, 255 kB\)](#)
- [Siyaasadda magangelyada iyo hawlaha oggolaashada joogitaanka ee norwiijiga \(engelsk\) \(pdf, 334 kB\)](#)

Waa ayo cidda dib loo qiimeynayo xaaladiisa qaxootinimo?

Xaaladaada qaxootinimo ayaa dib loo qiimeynayaa haddii aad Norway u timi si magangelyodoone ah oo la siiyey qaxootinimo intii ka horreysay 1. oktoobar 2014, laakiin aan weli helin oggolaansho rasmi ah.

Haddii tani ku khuseyso, waxaad markaa heysataa warqaad socdaalka doogo/cagaarka ah ee qaxootiga.

Waxa sidoo kale xaaladaada qaxootinimo dib loo qiimeynayaa haddii qaxootimada lagugu siiyey sababta xaas, qof aad la nooshey ama waalidkaa oo qaxootinimo Norway laga siiyey, kuwaas oo la siiyey intii ka horreysay 1. oktoobar 2014. Haddii uu qofkaasi horay u helay oggolaansho joogitaan oo rasmi ah, oggolaansho degenaansho ama dhalasho noorwiiji ah, markaa qiimeyn ku samayn meyno xaaladaada qaxootinimo.

Maxaa ku dhici doona oggolaashahaaga joogitaan?

Qeybta magangelyada ee UDI ayaa qiimeynaysa in isbedelka ka dhacey Muqdisho uu keenayo in aanaad u baahneyn magangelyo.

Waxaan go'aamin doonaa bal

- Inaad aqoonsigaaga qaxootinimo heysan karo oo joogeyso Norway, ama

- Inaad lumiso aqoonsigaaga qaxootinimo, laguna siinin nooc kale oo oggolaansho degennaansho, waa inaad markaa dalkaagii u safarto.

Haddii aad Norway joogeyso, UDI ayaa qiimayneysa codsigaaga oggolaansho joogitaan oo rasmi ah.

Waa inaad codsato oggolaansho joogitaan oo ku meelgaadh ah inta aad jawaab sugeyso

Dad badan oo Soomaaliya ka yimi ayaa la siiyey oggolaansho joogitaan oo ku meelgaadh ah, kaadh joogitaan oo cusub iyo baasaaboorka cusub, inta ay jawaab ka sugayaan codsiga oggolaansho joogitaan oo rasmi ah.

Haddii lagu siiyey oggolaansho joogitaan noocan ah oo ku meelgaadh ah, oo dhacey ama dhawaan dhacaya, [waa inaad codsato si aad u cusbooneysiiso](#), si aad u heysato oggolaansho joogitaan oo shaqeynaya ilaa intaad ka helayso jawaabta codsigaaga degennaanshaha rasmiga ah. Waa inaad sidoo [codsato si aad u cusbooneysiiso baasaboorkaaga](#). Eeg macluumaadka ku saabsan [waqtiga la sugayo cusbooneysiinta oggolaansho joogitaan ee magangelyada](#).

Maxaa ku dhacaya codsiyada xubnaha qoyskaaga?

Haddii aad leedahey xaas, qof wada nooshiin ama carruur kuwaas oo codsadey cusbooneysiinta oggolaanshahooda joogitaan, ama degennaanshaha rasmiga ah, sida caadiga ha waa loo cusbooneysiiyaa oggolaanshaha joogitaan haddii adiga lagu soo oggolaado. Haddii ay codsadeen baasaboorka ajinebiga oo cusub ama warqada cadeynta safarka, sidoo kale waanu eegaynaa codsigan.

Haddii adiga lagu soo diido cusbooneysiinta oggolaansho joogitaan, markaa ma helayaan xubnaha qoyskaaga sidoo kale.

Haddii aad leedahey xaas, qof wada nooshiin ama carruur oo markii ugu horeeyay codsadey isukeenid qoys oo debeda ku nool, ma helayaan jawaab ilaa inta aad jawaab ka helayso inaad sii haysato xaaladaada qaxootinimo.

Maxaa ku dhacaya carruurta Norway ku dhalatey?

Haddii aad leedahey carruur ku dhalatey Norway oo aan weli laheyn oggolaansho joogitaan, waa [inaad carruurta u codsato oggolaansho joogitaan](#).

Haddii aad carruurta u codsatey degennaansho rasmi ah waxa marka hore ilmaha la siin karaa oggolaansho joogitaan oo ku meelgaadh ah. Markaad hesho jawaab inaad sii haysato xaaladaada qaxootinimo, ayaanu ka baaraandegaynaa codsiga degennaansho rasmi ah.

Muddo intee le'eg ayaad sugeysaa?

Haddii aad codsatey degennaansho rasmi ah oo aanaad weli helin jawaab, waa inaad UDI jawaab ka sugto.

Waan ku xunnahey in aanaan kuu sheegi karin muddada ay qaadaneyso dhameystirka kabaaraandegida codsigaaga. Sidaa darteed ha iibsano tigidh aad debeda ugu dhoofeyso kahor inta aanaad jawaab ka helin codsigaaga ama lagu siinin oggolaansho joogitaan oo ku meelgaadh ah, kaadh joogitaan cusub iyo baasaaboorka. Haddii aanaad jawaab ka helin codsigaaga ama oggolaansho joogitaan oo ku meelgaadh ah, markaa laguma siin karo kaadh joogitaan cusub iyo baasaaboorka.

Waanu kula soo xidhiidheynaa haddii aan kaaga baahano warqado dheeraad ah ama macluumaadyo kale. Farriin ayaad naga helaysaa kadib marka aanu kiiskaaga dhameyno.

Haddii aad u baahantahey [caddeyn muujineysa inaad Norway si sharci ah u joogto inta aad jawaab sugayso, waxaad ka dalban kartaa UDI.](#)

Haddii aad codsatey degennaansho rasmi ah ugu dambeyn bil kahor inta aan deganaanshihii hore kaa dhicin, waxaad leedahey xuquuqo la mid ah kuwii hore aad u laheyd sida inaad shaqeyso, waxbarato iyo wixii la mid ah inta aad jawaabta sugays. Xuquuqahan waxaad leedahey ilaa inta aad jawaab codsigaaga ka helayso, xataa haddii uu oggolaanshuhu kaa dhaco mudada sugitaanka.

Haddii aad hesho warqad ay ku taallo in UDI qiimayneyso inaad lumineyso xaaladaada qaxootinimo, waxaad xaq u leedahey qareen. Waa inaad adigu qareenka la xidhiidho.

Yaan xaaladda qaxootinimadooda lagu sameyn doonin qiimeyn cusub?

- Adiga degannaanshihiisii ugu horreyay la siiyey kadib 1 oktoobar 2014.
- Adiga heysta degennansho rasmi ah, oggolaansho degennaansho ama dhalasho noorwiiji ah.
- Adiga qaxootinnimo lagu siiyey sababta xaaska, qofka lala noolyahey ama waalidkaa oo loo aqoonsadey qaxootinnimo, haddii markaa qofkan hore loo siiyey degennansho rasmi ah, oggolaansho degennaansho ama dhalasho noorwiiji ah.
- Adiga Norway dib udejin qaxootinimo lagu keenay (kvoteflyktning).
- Adiga oggolaanshaha degennaansho lagu siiyey bini-aadamnimo darteed (aad loogu tixgeliyey bini-aadamnimo darteed, ama si gaar ah Norway ugu xidhan). Haddii tani adiga ku khuseyso waxaad markaa heysataa baasaaboorka ajinebiga ee buluuga ah.
- Adiga Norway ku yimi isukeenid qoys, halkaas oo xubinta qoyska ee ku keentay heysato degennansho rasmi ah, oggolaansho degennaansho ama dhalasho noorwiiji ah, ama la siiyey qaxootinnimo kadib 1 oktoobar 2014.

Haddii aad ku sugantahey xaalad sidan oo kale ah markaa codsigaaga ku saaban degennaansho rasmi ah waxaa looga baaraandegayaa si caadi ah. Waxaad macluumaad ku saabsan muddada aad sugayso ka helaysaa [hagaha wakhtiyada ka baaraandega ee codsiyada ku saabsan wakhtiyada ka baaraandegida ee degennaanshaha rasmiga ah](#) .